

Jawaabtii baadhitaanka saxarada ee kansarka mindhicirka: iska soo qaad soona dir saxaro kale

Shaybaadhku wuxu isku deyay inu baadho saxarada aad u soo dirtay si looga baadho kansarka mindhicirka. Sababo farsamo awgood waxa suurtagal noqon wayday in la baadho saxaradaas.

Sidaas awgeed waxa laguu soo diray waraaq cusub ay la socdaan xidhmo baadhitaan iyo hage, si aad isaga soo qaaddo saxaro kale oo cusub.

Waa muhiim inaad jawaabcelinta ku soo dul qorto magacaaga iyo cpr-nummerkaaga. Halka lagu qorayaa waxay ka hoosaysaa fallaadha cas ee gunta dhinaca midig ee waraaqda aad ka heshay boosta.

Sida loo qaado saxarada, waxaad ka akhrisan kartaa ayado oo af Soomali ah halkan: [LINK](#)
Isla markaad qaaddo saxarada la baadhayo, fadlan si dhaqso u soo dir.

Haddaad ku talagashay safar, sug inaad soo dirto saxarada, intaad dib u soo noqonayso.

Haddaad su'aalo qabto, fadlan la xidhiidh xoghaynta baadhitaanka ee gobolkaaga.

Salaan sharaf leh,

Xoghaynta baadhitaanka ee gobolka Nordjylland, tel.: 97 64 17 12

Xoghaynta baadhitaanka ee gobolka Midtjylland, tel.: 78 42 01 70

Xoghaynta baadhitaanka ee gobolka Syddanmark, tel.: 79 40 67 85

Xoghaynta baadhitaanka ee gobolka Sjælland, tel.: 56 51 28 28

Xoghaynta baadhitaanka ee gobolka Hovedstaden, tel.: 38 67 17 17

